

KHARASHKA KA HORTAGA LA-WAREEGISTA DEG DEGA AH

Magaalada Boston waxay u abuurday kharashka(Sanduuqa) Ka Hortagga La-Wareejista Deg-degga ah kuwa aadka ugu halista badan in lagala wareego sababtuna aytahay saamaynta taban/xun ee musiibada COVID-19.

KHARASHKA KA HORTAGGA LA-WAREEGA DEGDEGGA AH WAXA LOOGU TALA GALAY:

- [Milkiilayaasha guryaha Boston](#) ee leh dakhliga u-qalma
- Ku nool guri ay leeyihiin
- Waxayna ku jiraan halis aad u sarreysa in lagala wareego sababtuna tahay saamaynta taban ee dhaqaale ee ka dhalatay musiibada COVID
 - Oo ay ugu yaraan 90 maalmood ka daahsanyihiin lahaanshaha guriga sababo la xariira lacag bixinta.

HADDII AAD U MALEENEYSO IN AAD U QALANTO KAALMO, AMA AAD QABTO WAX SU'AALO AH, FADLAN LA XIRIIR MID KA MID AH HAY'ADAHA LAMMAANAHEENA AH OO WAXAYNA KUGU CAAWIN KARAAN INAAD QAADATO TALAABOYINKA XIGA:

- ESAC: (617) 524-2555, ext 108 ama sbennett@esacboston.org
- Urban Edge: (617) 989-9309 ama fbowen@urbanedge.org
- ABCD - Mattapan: (617) 298-2045 ama staff_mattapanfsc@bostonabcd.org

WAA MAXAY SHURUUDAHA U-QALMITAANKA SI AAD U HESHO KHARASHKA?

1. **QOYSKAAGA WAA INUU DAKHLI AHAAN HELAA IN KA YAR 150% DAKHLIGA DHEXE EE AAGGA SI AAD UGU QALANTAAN KHARASHKA (bit.ly/mohincomelimits)**

2. DADKA GURYAHA LEH WAA IN AY KA MID YIHIIN UGU YARAAN MID QEYBAHA SOO SOCDAAN:

- Leh unuga "ficil xaddidan"
- Horey u dalbaday wax -ka -beddelid laakiin la diiday
- Ah qof ku sarreeya cinwaanka canshuurta
- Kujira dib-u-bixinta deeynta leh khaladaadka ku jira qaybta lacag bixinta
- Leh khaladaadka deeynta taas oo loo gudbiyay la-taliye sharci
- Aad heshay ogeysiiska Xeerka Askarta iyo Badmaaxyada ama aad maxkamada u gudbiso codsi si aad u joojiso lawareegista
- Leh hantida qoys-badan oo aad leedahay kiraysteyaal aan bixin dhammaan ama qayb ka mid ah kirada tan iyo bishii Maarso 2020
- Aad u qaadanayso deyn guri sabab ah dhimasho, furiin, ama qeybinta kale ee qoyska
- Haysta aan ahayn-FHA (non-FHA), Amaahda FHFA, MHP, ama MHFA
- Wuxuu halis ugu jiraa inuu noqdo 90 maalmood dambiile ku xadgudbay bixinta khidmadaha/biilal kasta(sida korontada,biyaha iwm)

3. DADKA GURYAHA LEH WAA INEY UGU YARAAN 90 MAALMOOD AY KA DAAHSAN YIHIIN MID KA MID AH LACAG BIXINADA SOO SOCDA EE LA XIRIIRA LAHAANSHAHA GURIGA DANBAN SIDA LOO BIXIYO BIXINTA LA XIRIIRTA GURIGA:

- Lacag bixinada deeynta
- Bixinta lacagta dulsaarka ee deeyntaada
- Canshuurta hantida maguurtada ee gurigaaga
- Bixinta lacagaha ceymiska ee gurigaaga
- Lacagaha khidmada ee ururka iskaashatada
- "Lacag-bixinnada hoose" ee wax ka-beddelka amaahda
- Bixinta lacagaha khidmadaha billka ah (sida biyaha,korontada iwm)